



Xfiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

WARSAXAAFADEED 018/2010

Sarkaalka Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay uga hooseeya arrimaha Siyaasadda oo Muqdisho ku booqday Madaxweyne Sheekh Sharif

Nayroobi, 2 September 2010 – Sarkaalka Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay uga hooseeya arrimaha Siyaasadda, Lynn Pascoe, ayaa muujiyay taageerada uu u hayo dadka Soomaaliyeed isagoo booqasho hal maalin ah Muqdisho ku tagay shalay (Arbaco). Md. Pascoe, oo uu weheliyay Ergeyga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya, Augustine P. Mahiga, ayaa Madaxweyne Sheekh Sharif iyo Golaha Wasiirrada kula kulmay Xarunta Madaxtooyada oo loo yaqaano Villa Somalia.

Md Pascoe wuxuu ku guubaabiyay madaxda Dowladda Federaalka ee Ku Meelgaarka ah inay la xiriiraan kooxaha kale [ee dowladda ka soo horjeeda] isla markaana diiradda saaraan maamulka dalka.

“Waxaa muhiim ah in dadka Soomaaliyeed ee ay muddada dheer dhibaataadu haysatay ay arkaan in Dowladdu gaarsiin karto adeegyada asaasiga,” ayuu yiri Md. Pascoe. “Bulshada Caalamku waxay aad u danaynaysaa inay taageerto Dowladda Federaalka Ku Meelgaarka ah, laakiin Dowladda lafteeda ayaa u baahan inay hawl badan qabato, baratana inay u shaqayso iyadoo ah koox isku duuban oo wadajir ah”.

Md. Pascoe iyo Md. Mahiga waxay kaloo la kulmeen Taliyaha Ciidamada AMISOM iyo xubno ka mid ah ciidamada, waxayna booqdeen isbitaalka AMISOM halkaasoo ay ku goobjoog u ahaayeen ciidamada nabadilalinta Midowga Afrika oo daweynaya dadka rayidka Soomaaliyeed.

Sarkaalka Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay uga hooseeya arrimaha Siyaasadda wuxuu amaanay hawsha ciidamada Midowga Afrika ay ka wadaan Soomaaliya tan iyo 2007, si ay gacan uga geysan lahaayeen habkii ay Dowladdu ku xasili lahayd. Wuxuu kaloo Qaramada Midoobay ku amaanay taageerada saadka ee ay u fidinayso Dowladda. Isla markaana wuxuu ku baaqay in la keeno ciidamo hor leh iyo taageero dhaqaale iyo saadba oo loo fidiyo ciidamada gaaraya 7,000 oo askari.

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilsan isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6805 / 6869 ama +254 733902020 ama 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):

www.unpos.unmission.org



Xfiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

Md. Pascoe wuxuu waddamada gobolka ku maraya socdaal ay ujeeddadiisu tahay sidii taageero loogu heli lahaa dadaalka nabadaynta iyo xasilloonida Soomaaliya. Wuxuu ka qaybgalay kulan ay Qaahira ku yeesheen Ergada Nabadda Afrika, wuxuuna markaa ka dib socdaal ku tagay Jabuuti, Eritrea iyo Ethiopia oo uu kula kulmay Madaxda Dowladaha iyo Xukuumadaha, diblomaasiyiinta, hay'adaha gargaarka baniaadanimo ee aan dowliga ahayn (NGOs) iyo Hay'adaha Qaramada Midoobay.

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilsan isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6805 / 6869 ama +254 733902020 ama 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):

www.unpos.unmission.org